25 - XANNAANADA CARUURTA

Waxaa jira jaalle Maryan, sidaan horey uga soo sheekeeyey, GOCOSADA inay ka mid tahay waxa la yiraahdo SIMAAR.
Simaartu waxa weeyaan miraha geedaha ka baxa iyo kuwa dhulka laga qoto labadaba. Kuwa geedaha ka baxa waxa ka mid ah MIRACASKA, KALALMISKA, HOHOBTA, ODAY-JECELKA, GOBASHAAGA, ILGAALKA, KOOXADA, CAMBARUUDDA, YICIBKA. Waxaa ugu muhimsan, intaas miro ah oo aan soo sheegnay, YICIBKA iyo HOHOBTA oo haddii ay dhacdo dhibaato raashin la'aan ah lagu baxsan karo(?). YICIBKU waa midka laga maahmaahay oo la yiri:" Fadhi iyo fuudyicib la isku waa ". Hadalkaas dulucdiisana waxay u dheceysaa, nin meel fadhiya yicib uma yimaado. Waa inuu u arhaa, awr u rartaa, meel omos ah u tagaa, u oomaa, u gaajoodaa, u dhibtoodaa. Yicibtana, marka u horreysa, geedka uu ka baxo GUD baa la yiraah magaciisa. Meeshaas uu geedka GUDDA ah ka baxo ee ARAHDA loo aaday ee awrta loo rartay. Marka ugu horreysa, yicibka waa la guraa. Yicibka marka la guro ayaa la hogeeyaa. Markii la hogeeyo ayaa la waraa. Markuu qallalo baa waxa lagu soo guraa JAWAANNO, markaasaa awrta lagu soo rartaa. Markii yicibka la hogeeyo baa waxaa laga rogaa QOLOF weyn oo marka ugu horreysa ka sarreysa. Isagoo qoloftaas laga bixiyey ee middaan yar kaliya loo reebo ayaa la soo qaataa, jawaanadaa lagu soo shubaa , barta yar laga bixiyaa ama sidiisaa inta loo beeriyo asagoo BEER wada ah oo qoloftii laga bixiyey yaa sidiisa loo cunaa ama biyo ayaa lagu karshaa. Biyahaas lagu kariyeyna waa la cabbaa oo waxaad moodda biyo sokoreysan, isagana, hadhow, subag iyo caano ayaa lagu cunaa. Marka, biyahiisuna guduud bay noqdaan, xoolaha geedkaas uu ka baxo yicika daaqa , ee gudda ah, lafahooda iyo hilibkooduba wuxuu noqdaa guduud aad mooddo in rinji la marshay. Kaas waa yicibka waa midka miraha ugu qiimaha badan. Kan ku xigoo labaad waxa weeye bahasha la yiraahdo hohobta, geed yar oo geedaha miracaska ah oo geedmiroodka ka mid ah ayey ka baxdaa. Hohobta marka horana CARGO ahaan baa loo cunaa oo dadka iyo carruurta sidiisey isaga cunaan; marka dambey qallashana diirkaas yarka ayaa laga qaadaa miraha hohobta waxaa lagu gurtaa ama kallooradaha ama tebbedaha. Hohobta, markii loo baahdo, ayadoo saa isu hayhaysata yaa waxa lagu ridqayaa caano. Caanahaasaad ku qoynayaa oo waa dhiimaysaa, waa dhiimaysaa, waa dhiimaysaa, hadhow, waxa ka baxaya mirihii, dubkii guduudna iyo dhiinkii oo dhanna waxay ku hareen caanihii. Hohobta sidaas ayaa loo cunaa, aad iyo aad bayna wax-tar wweyn u leedahay.

Maryan: Haddana waxaa wareysi la yeelanaynaa jaalle Xaliimo Jaamac oo ka timid gobolka Mudug, waxaana jaalle Xaliima warsaneynaa: Bal reer-miyiga soomaalida oo ku nool gobolkaas sida ay u xannaanaystaan carruurta, cunnada ay siiyaan, hadday ka bukoodaan geedaha ay ku daaweystaan. Waagii hore, dadku ma wada heli karin dhar ay carruurta ku qabtaan ama ku xambaartaan, marka waxa jira harag ay kala bixi jireen xoolahooda oo ay carruurta ku qaadan jireen, oo hu' uga dhigan jireen, bal sida haraggaas loo

farsameeyo iyo magaciisa . Waxaa kale oo aan rabna in jalle Xaliimo ay noo sheegto, carrruurta waxa jira weel gaar ah oo wax ku cunaan oo hooyadu u tosho,dhiil gaar ah, magaceeda iyo sida ayadana loo culo ama loo nadiifiyo sida carruurta miyiga loo nadiifiyo. Arrimahaas oo dhan jaalle Xaliimo ku soo dhowoow.

Xaliima Jaamac

Carrurrta, haddaynu reermiyi nahay, waxaynu ku xannaanayna amase ku soo qaadanna dhar. Markii ay dhashaan carruurta, hooyada uma ay sameyn jirin dhar fara badan oo ay ku kala xambaarto. Markii ay dhashaan ilmaha waxay u badnaan jiree inay habartu, maradeedii horoo ay marada ka qaadatay intay u dhaqato meel ugu ridato oo markii ay dhashaan ay hadhowto u jeexjeexato; kabacdina QEYD loogugu keeno ay ku xambaarto. Marka, ilmaha waxaa la siiyaa, markii ay dhashaan, geed la yiraahdo
MALMAL, marka ugu horreeya. Malmalkaas oo lagu akhriyo wax ugu horreeya oo ay cabbaan.
Suaal:Maxaa malmalku ka sameysan yahay, geedkee buu ka baxaa, maxaase lagu daraa? Ma caano, ma subag mase biyo?
Jawaab: Malmalku xabag weeye oo wuxuu ka dhashaa geed xabag leh oo magaciisaba malmal la yiraahdo. Xabagtaasaa wax yar oo biyo ah lagu qasahayaa, wax yar oo aan ilmaha wax yeelin ayaa laga siinayaa oo daawo ugu filan.
Suaal: Maxaa ulajeeddada, marka hore loogu afurinayo ilmaha malmalka, ay tahay?
Jawaab: Ilmaha waxa loogu afurinayaa waxa dadku ilmaha ka geliyaa cusbada( cudur looga cabsanay) oo ilmana geedkaas baa la siiyaa ilmana cusbadaas uun bay qaabilaan. Kabacdi, ilmaha caanaa lagu qabanhayaa, ilaa laba habeen ay ka joogtana, habarta naaskeeda ma ay nuugahayaa; ka bacdina naaska hooyadood bay nuugahayaan. Dhiil yar oo habin ah ayaa loo tolayaa, intayna ilmaha dhalan. Kabacdina dhiishaas ayaa loogu shubayaa neef dhalmocuseyb ah caanihiisa.
Suaal: Caanaha loogu shubayo ma geelbaa, ma lo'baa, ma ari baa?
Jawaab: Ari iyo lo' kii markaas reerka xoolihiisa u badan yihiin. Hadba neefka, ugu dhalmada dhow, caanihiisa ayaa loogu shubayaa.
Cudurro badan oo carruurta caloosha ka qabta ayaa jira oo dadku ay gubaan oo dab baa ilmaha caloosha lagaga dhejiyaa.
Suaal: Haddii hooyada aayan heli karin maro ama qeyd ay ku xambaarto cunugga, maxay meeshii qeydka ilmaha ku xambaartaa?
Jawaab: Hooyadu, haddii ilmaha dhashay ayan ilmo awal ka horreyn, maradeeday qaar u jeexdaa, haddii ilmo ka weeynaayeenna kuwii hore wixii ay huwin jirtay ayey ku qaaddaa, habeenkiina ayada uun bay la seexdaan ilmihii oo dhan.
Suaal: Waxaa jirta hooyooyinka miyiga wax ay caan ku yihiin, baa la yiri, harag oo ay sameeyaan oo ay ku xambaaraan carruurta oo la yiraahdo FURAAD. Bal furaadkaa inooga sheekee.
Jawaab: Furaadkaas waa jiraa. Furaadkaas waa harag ka sameysan sheyga idaha la yiraahdo ama neefka idaha ah.
Suaal: Sideeba loo sameeyaa?

Jawaab: Waxaa loo sameeyaa, neefka markii haragga laga bixiyo ayaa dhinaca dhogorta xiga maahana dhinaca kale laga xoqaa. Markii la xoqo oo laga dhammeeyo hilibka ayaa qallajiyaa, la jejebiyaa oo la jiidjiidaa si' uu dheeraado haraggu. Markii uu qallalo haraggu ayaa la geliyaa fuud heen leh amase caaneeyo subag laga baxshay. Markii saddex jeer la geliyo fuudkaas heenka leh oo la jejebiyo ayaa haragga la dhisaa oo dhogorta iyo haragga oo haraggii oo maro cad u eg la soo bixiyaa. Haraggaas cad ayaa haddana saddex jeer inta caano la geliyo la jejebiyaa oo laga dhigaa maro camal la soo saaraa. Markaas ka bacdi baa asal la geliyaa iyo subag oo la tolaayoo aleel iyo loo yeelaa shucubbo. Markaasaa haraggaas la sameeyey ilmihii lagu xambaaraa oo FURAAD baa la yiraahdaa. Furaadka ilmaha ayaa lagu furaadiya , i caashaan meeshaas ilmihii uusan maro u baahnayn. Inkastuu furaadku kulul yahayoo marka ay qorrax tahay uu ilmaha marada uga kulul yahay.
Suaal: Ma dhegaasyuu leeyahay mase xarig baa dhexda looga xiraa, furaadka maxaa hooyada iyo ilmaha iskula haya?
Jawaab: Waxaa iskula haya, laba suun buu gadaal dambana ku leeyahay oo habartu dhexda ku xirataa oo dhegaasya ah, xaggakan qarqarka hooyadana sidoo kaluu suun ugu leeyahay oo la isasuro oo ay ku furaadsan tahay oo ilmihii ayan dhibaato ka soo gaaraynin markii ay qorrax kulayl ahi soo bixin . Markay qorrax kulayl ahi soo baxdo aad buu furaadku ilmaha ugu kulul yahay oo ugu dhibaato badan yahay.
Suaal. Magaalada hooyooyinka joogaa waxay gataan maro bambiiro ah oo ay dhowraarin ka dhigtaa oo ay dhabta saartaan oo ay iskaga dhowraan ilmaha wasakhda ka timaadda. Hooyooyinka miyigu maxay sameeyaan?
Jawaab: Kuwa miyigu waxay sameeyaan, neef haraggiisey intay dhisaan oo dhulka ku dhisaan oo aad iyo aad u dheereeyaan oo u kala bixiyaan ayey dhogorta ka xiiraan amase asagoo dhogortiisa leh oo aad u dhisan ayey dhabta saartaan oo uga ilaashadaan ilmaha wasakhda.
Suaal: Marka waxaad leedahay, hooyada miyigu waxay leedahay, harag weylaalis camal ah oo ay ugu talagashay inay ilmaha isaga xijiso wixii kaadi iyo wasakh ah oo ka iman kara si' ayan oogadeeda wasakhdii u gaarin. Xaliimow, malmalkii waa noo sheegtay in carruurta lagu daaweeyo. Bal dhirta kale ee dhir-carruureedka ah oo ay hooyooyinka miyigu ay carruurta ku daaweeyaan wax nooga sheeg.
Jawaab: Carruurta miyiga hooyadu waxay ku daaweysaa, dhir-carruureed dhir la yiraahdo oo goortey xaariwaayaan intay qorqorto dabada ka geliso. Haddana waxaa jirta dhir kale oo carruurta loo xannaaneeyo oo waxaa ka mid ah KABARAANI geed la yiraahdo. Waxaa kale oo jira geed kaloo la yiraahdo XULBAD iyo XILDIID oo ilmaha markay dhashaan habarta ugu dadaasho inay ursiiso amase gacanta ugu xirto. Waxaa kaloo ilmaha lagu xannaaneeyaa iyaga oo loogu dadaalo qubeyska salaaddii iyo maqribkii markay tahay oo loola jeedo intaan qorraxdu dhicin iyo markan la yiraahdo"intaan haadku kicin amase fariisan oo ay DHEBEDDA ula jeedaan.
Suaal: Xaliimooy, bal waxaad noo sheegtaa, hooyada miyigu, carruurta intay yaryar yihiin, waxay aad caan ugu yihiin inay si weyn oo aad iyo aad

ah u xannaaneeyaan. Hooyooyinkaas xageebey carruurta seexiyaan? Ma dhulkaa la seexiyaa? Gobollada qaarkood, waxaan maqlay,waxay carruurta u dhisaan meel sariir oo kaleeto ah . Bal taana wax nooga sheeg.
Jawaab: Hooyooyinka carruurtooda waxay u sameeyaan DARGAD wax la yiraahdo.
Suaal: Xaliimooy, dargadda maxay ka sameysan tahay, bal si' fiican noogu faahfaahi.
Jawaab: Dargaddu waxay ka sameysan tahay qoryo dhulka lagu mudmuday oo haddana kuwa kale kor lagaga raseeyey oo markaas harag lagu goglay iyo barkin yaroo soo-ma-gala ah, maro yarna lagu fidiyey. Meeshaasoo ilmihii ay uga dhowrayso wixii bahal ahoo hoos marahayey iyo dadka ku joogsanahayo, iyagiina ay sariir u tahay. Marka ilmihii meeshaasaa wax lagu siinahayaa, markii la soo qaadahayana, hooyo ka soo qaadanaysaa, markii kale ay saas u seexinaysaa.
Suaal: Ilmuhu imisa sano ayey naaska nuugaaan?
Jawaab: Ilmuhu laba sano ay naaska hooyada nuugahayaan. Labadaas sano waxay habarta uga dhowraysaa si' ay ilmuhu uga fadhiidinoo ayan uga farrisan, iyagoo aan milaygoodi joogin hadday naaska ka gooyso, ilmihii cuyaan camaley noqonayaan oo ma xoogsanayaa oo ma adkaanayaan. Labadaas sano si' ay ilmaheeda ugu xoogsadaan bay habartu ugu dadaaleysaa amase ayan ilma kale hoos gelin karin. Labadaas sano ka bacdi, ilmihii oo socda oo weynaaday, bay habartu iska goyn kartaa iyadoo wax ay u keenin karaan.
Suaal: Bal Xaliimooy, waxa kale oo aad noo sheegtaa, sida reer-miyigu aqalka u nadiifsadaan, weelasha ay wax ku cunaan ha ahaato amase qalka hooyga sida hooyo u nadiifiso.
Jawaab: Markii ay roob tahay, aqalka waxaa la dhigayaa YACAY. Yacaygaasoo la saarahayo kebdaha iyo rarada duuban iyo wixii laga kor xirahayo oo tebedaha iyo sheeyada wax lagu gurto oo kale. Waxa la yeelahayaa, aqalka waa la kashkaashahayaa oo waxaa jira caws ka celiya roobka ee uusan ka soo geli karin. Markii ay roob tahay, meesha hadday DIBIR tahay dhagax baa lagu soo gurayaa aqalka. Dhagaxa markii lagu guro ayaa cawska laga kor marinhayaa.Cawskaas markii laga kor mariyo ayaa raarta lagu goglan karaa, markii uu roobku kaco. Aqalka waxaa aqalka boorka lagaga iyadoo la aslo oo boorka asalkaa lagaga jafahayaa. Hooyada gaarida ahi, markii aqalkeeda ay dhiseyso wax uun bay marisaa. Iyadoo qorraxda ka dhowrta, iyadoo dabeesha ka dhowrta iyo waxay isku dareysaa iyadoo aad uga dadaasha inuusan dhulka ka taataaban ee uusan ciida uga dhicin. Sheyga ay wax ku cunayso way dhaqeysaa oo meel bay ku rideysaa; markii ay la soo baxaysana haddii wax lagu cunane sidii kale ayey u nadiifinaysaa. Weelka waa la catireynayaa oo catir buu leeyahay; Catirta waa kale leeyahoo haamo iyo dhiilo u kala leeyahay. Hadduu u kala leeyahayna waa kala jilisan yahay sheyga lagu catireynahayo. Dhiisha catirteedu wayjilicsan tahay, haanta catirteeduna way adagtahay. Marka culaygana waa kala leeyihiinoo geedo kala nooc ah baa lagu kala culaa. Dhiisha waxay iska leedahay culay udgoonoo geednugeyl ah oo jilicsan. Geednugeylkaas dhiilaha lagu culo waxaa ka mid ah: bilinbilqo, kabrar,

dhirindhir iwm. Haamahana waxaa lagu culaa geedaha ay ka midka yihiin: meygaagga, shillinka, mareerka, xamurka iwm.
Suaal: Waxay tahay ulajeeddada loo culaayo?
Jawaab: Ulajeeddada loo culaayo waa nadaafad iyo in lagu udgiyo oo haddii aan la culin caanaha bay xumeynahayaa amase la catireyn, gudahoodana waa xumaanahayaa. Middeeda kale waa tan soomaalidu ku maahmaahdo:" Naagtii caano dhigaalxuneey, adiguna ku kul xumid", amase waa tan la yiraah: " Naag xun ninkeedu haddii qodaxi muddo kama kaco ". Caafimaad dartiisaa loo culaa weelka. Weliba markii ay kululus tahay aad iyo aad baa weelka loo sii culaa, markuu roobku soo dhow yahay. Markii ay jiilaal tahayse wax ma lahoo dhowr beri waa ku maali kartaa. Laakiin markii ay doog tahay waa inaad haddiba ugu dadadaashaa culayga si aan weelku ama kaaga sunyucin ama kaaga qurmin oo uusam kaaga dhalan bahal. Kulayka ayaa keenaya suyuca badan oo dadku, marka ay kuleel tahay ee roobku soo dhowdhow yahay, waa kan dhidid badan. Sidaas daraadeeduu weelkuna uu, xilligga, u dhididahayaa oo u suyucahayaa.

Shirguddoonka

Jaale Xalwo, waxaan ku warsanaynaa, xannaanada carruurta iyo gobolka aad ka timid sida looga xannaaneeyo. Waad maqlaysay jaalle Xaliimo Jaamac oo noo sheegtay in carruurta marka ay dhashaan waxa ugu horreeya ama lagu anqariyo ama lagu afuriyo uu yahay MALMALKA oo mudaawaadka looga jeedo. Waxa suurtowdo, gobollada iyo degmooyinka waddanka, in qolaba ay leedahay caado gooni ah ama si gooni ah oo ay carrurta u anqariso. Bal gobolka aad ka timid sideebaad u anqarisaan carruurta?. Waxaa kale oo aad noo sheegeysaa, geedaha mudaawaadka ah ee carruurta hadday xanuunsadaan, gobolkiinna, looga daaweeyo. Waxaa kale oo aad noo sheegeysaa oo aan jecel nahay inaan wax ka ogaanno FURAADKA oo ah shey aad u qeymo badan, marka la joogo miyiga,oo waxtarmo weyn u leh xambaaridda carruurta, sida loo sameeyo, haddii Xaliimo wax ka dhaaftay. Waxaan kaloo doonaynaa ayaduna, sariir ma jirto miyiga, laakiin wax la mid ah ayaa haweenka miyiga, oo aad ugu horreeya farsamada ugu horreeya, ay u sameyn jireen si' ay carruurta yaryarka ah u daryeelaan. Waxaan kaloo doonaynaa, iyadana, inaad noo sheegtid waqtiga hooyada, miyiga joogta, ay carruurta ka goyso naaska. Ku soo dhowoow jaalle.

Xalwo

Waxaa jirta dadka reer-miyiga ah xannaanada ay curruurta ku xannaanaystaan inay iska tahay, ama uba xannaaneysan jireen waqtiyadii hore, xannaano caadi ah. Xannaanadaasi waxay ku dhisan tahay iyaga dabeecadahooda iyo caadooyinkooda reer-miyiga ee ma aha caadooyinkan casriga ahoo dhakhtarrada laga shidaal-qaata ma ahayn oo waxay iska ahayd naxxaano reer-baadiye. Ilmuhu markii ay dhashaan oo ay hooyadood ka soo dhacaan ee xuddunta loo gooyo, in yar kaddibba, hooyadood naaskeeda laguma bilaabo; waaxaa loo sameeyaan haruub yar ama galaas yar (weel yar) oo ilmahaas afkiisa geli kara baa waxaa loogu soo dhiijiyaa caano yar oo dhay ah . Caanahaasoo marba laga soo liso neefkii xoolaha ugu dhalmo cusub oo aan laga soo lisin xoolo dhalmadoodu waa hore

ahayd oo caanahoodu yihiin caano duugoobay oo caano cusub baa ilmaha lagu anqariyaa. Waa iska jirtaa dadka qaarkiis inay ilmaha waxa ugu horreyoo ay siinayaa malmal ugu daraan ama biyo ha kula qabteen ama caanahaas ay ku bilaabayaa ha ku bilaabeene. Mar kastana malmalku gacanta kuma jiro oo shardi ma aha in ilmaha markuu soo dhacaba malmal siiyo, balse waa caado soomaalidu ay iska taqaanoo, haddii guriga malmal yaallo ilmaha ugu daraan ama biyo ama caanihii lagu anqarinaayey ilmaha lagu kabbiyo. Sababta loola jeedo malmalkaasi, dadkaa reer-miyiga ah sideedoodaba waxay u aaminsan yihiin inuu yahay geed-daawo oo daawo muctarif ah ayuu xaggooda ka yahay.Waxay ulajeedaan oo ay ilmaha u siinayaan malmalkaas ilmaha inaysan caloosha xanuunin oo waxa jirta wax la yiraahdo DAAB xataa xoolaha waa ku dhacdaa hadday yar yihiin, markay dhashaan. Daabtaasu waa calool xanuunka. Ilmuhu intuu yar yahay, ee uusan si fiican cuntada u baran, calool-xanuunkaasuu leeyahay. Daabtaasey gaga celin oo waxay leeyihiin ilmuhu yuusan daaban. Isla markaa waxa ugu weyn, hadhow markii caano badan ilmuhu cabbo yaan caloolxanuun ku kicin . Malmalkaas caloolxanuun soo sodaa looga gaashaamanayaa. Waxaa kaloo loola jeedaa malmalkaasi, ilmaha haddii malku ku adkaado ama xaarka ku adkaado ayuu wuxuu jilciyaa caloosha oo wuxuu u xisaaban yahay burkaanto oo kale, caloosha ayuu u jilciyaa ilmaha oo waxa la yiraah haddii malku ku dhego malmal halla siiyo, si' calooshiisu u jilicdoo oo ayan saxaradu ugu dhegin. Malmalkaas waa caynkaas waana geed daawo loola jeedo ama xaarka uu jilciyo ha ahaato ama caloolxanuunka uu ka ilaasha ha ahaatee. Ilmaha malmalka waa uba daawo. Waxaana caado u ah, markastaba, dhoqosha yaroo carruurta caanaha loogu shubo inaan malmalkaasi ka dhammaanin oo markastaba salka loogu rido illaa uu ilmahaasi qof weynoo socda ka noqdo. Waxaa kaloo jirta, iyadana, meesha ilmaha la seexiyo. Ilmaha markuu hooyadiis soo dhaafo waxaa loo sameeyaa meel yar oo yiraah DHARAB. Dharabtaas waa meel yaroo inta ciid lagu yar xaarxaaray oo dhulka sare looga qaatado ayaa waxaa la dhigahayaa caws iyo dhir jiljilicsan baa la soo goynhayaa, meeshaasaa la dhigahayaa, markaas ayaa waxa la saarahayaa harag ari oo jilicsanoo awal lagu talagalay in ilmaha loo goglo(dhowr harag ama mid ama saddex baa la isku kor saarahayaa, maro yarna waa loo dulsaarahayaa). Ilmahaas, markaas, wuxuu u egyahay ilmo dhulkii hoosoo dadku marahayey ka sarreeya oo meel yar oo loogu latagalay asaga loo dhisay saaran, oo sariir oo kale ah oo la yiraah dharabta ilmaha. Ilmahaas waxaa ay badanaaba cabbaan, illaa ay qof wax calaliso gaaraan, caano dhiil yar oo dhoqol ah lagu shubo. Dhoqoshaas geedwalba ilmaha looguma culo waa loo deebiyaa si' caanahaas ayan car u yeelan oo car kulul oo ayan carruurta cabbi karin u noqon geedo geednugeyl ah ee dhiisha wax car ah ku reebeynin ayaa dhiisha loogu culaa. Markii la culo ama deebshoo oo la catireeyo oo biyo yar lagu soo rogo oo laga seyriyo oo haddana caano lagu sii dhaqdhaqo ayaa ilmahaas meeshaas caano dhey ah loogu lisaa oo neef dhalay caanihi haddii la heli karo ah. Inta badan neef dhalay baa loo xulaa ilmaha si' caanihusu ilmaha ugu noqdaan caano labeen cusub leh ee nafaqo leh oo ayan noqon caano neef finnaaq ah amagibbaan ah laga soo

lisay. Caanahaas halkaa loogu shubaa, tan iyo qorraxda markay iska dhaceyso oo xoolihii kale soo imaanahayaan ama barqadii la lisi lahaa. Inta waqtigaas laga gaarahayaa, caanihii weelka culan ku jiray yaa marba in loo dhibcinahayaa oo afka loo saarahayaa, naaskii hooyadiisna waa nuugahayaa. Waxa magaalada ilmaha saacadda loo fiirinahayo ma jiraan miyiga, saacadduu doono ilmaheeda hooyadu naaska isaga duwanaysaa oo dhabteeda isaga haysanaysaa. Ama xoolo ha ku raacdo ama ha ku guurto ama ha ku arooriso ama guri ha ku joogtee, markii ayagu ay doonaan uu cunugu naaska u wareega ayey iska siisataa. Sida badan, sida aanu ognahay, xagga caafimaadka, miyiga kuma badna cudurrada carruurta ku dhaca. Carruurta miyiga waa carruur ku kortay hawo cusub, caano cusub iyo dhul iska cusub oo baadiya ah oo cidla' ah oo ilmaha cudurrada kumaba badna. Sidoodaba baadiyaha, ilmuhu hadduu toddoba bilood ama siddeed bilood ku socon waayo waxa la yiraahdaa waa maxay ilmahan fadhiya miyuu fadhiiday. Muxuu la socon waayey waa fadhiiday ilmahaas. Markaa ilmahaasu waa fadhiiday hadduu inta ku socon waayey bilhaa u horreeya waxaa loo qaadanayaa inuu fadhiiday. Fadhiidkaas hadduu ilmuhu horey u ordiwaayo waa la sarsaraa oo waxaa laga sarsaraa jilbaha, cagaha korkooda iyo labada jilib iyo caloosha oo waxa la yiraah waa fadhiiday ilmuhu. Marka waa caado soomaali. Sarsarkaas waxaa lagu daweeyaa ilmuhu markauu hore u socon waayo. Waxaa jirta, masalan, waxaan ka soo qaadnaa,waxaa ugu badan carruurta miyiga joogta markii bronkiito ku dhacdo, QAARJEEX baa miyiga la yiraahe. Marka qaarjeexaas uu caruurta ku dhaco miyiga, cudurkaasaana uguba badan waxa carruurta miyiga hela, reermiyiga waxaa caado u ah, malmalkii aan soo sheegnayne subag yar baa loogu shiilaa oo hadba la kabbiyaa. Waxaa kaloo la sameeyaa waa la gubaa ilmaha oo reermiyiga daawadooda rasmiga ah ee koowaad waa dabka. MAXAAR yar ama MUDAC bay dab gelinayaa halkaa naaska korkiisa ayey waxay uga dhigayaan dab yar oo isdhafsan oo isku-tillaab ah, garabka dabadiisana waa looga dhigaa. Labadaas dab oo mid waliba isweydaarka yahay ayaa halkaa naaska korkiisa iyo garabka dabadiisaa looga dhigaa; waxaana looga jeedaa in oodintaas ilmaha boronkiitada ku noqotay ay sii deyso. Xagga dhirta wax lagu daaweeyo, waxaa jirta in la yiraahdo: dadka magaalada ka yimid bay ilmuhu waxa ka uriyaanoo cadarka, saabuunta iyo wixii u soo uraba, xataa haweenka uurka leh ilmaha waa kaga soo dilmaan haddii wax magaalo laga keenay oo carfoon lala agmaro, waayo dhulkaas waa dhulka iska ay ah, oo waxaas waayadii hore laguma haysan jirin, hadda meel kasta waa iska magaalo. Waayadii hore dabeecaddeenna reermiyi haddaan soo qaadno waxa soo arfa waa ku yaraayeen, markii lala soo agmaro ama hooyo uur leh ama ilmo yar haysata oo waxaas urkooda u urto oo laga tago ayadoon waxba la ursiin waxaa meeshaas ka dhalan karta dhibaato ah in naagtii ilmaha ka dilaan ama cunuggii uu jirrado oo inta dibbiro oo calooshu weynaato oo matag iyo shuban ku waasho wixii uu uriyey dartood. Marka si aan uriskaas qof kale la urinhayaa u dhicin, hooyo kasta waxay ku dadaashaa inay gurigeeda wax uraaya dhigto. Waxaa ka mid ah waxa guryaha la dhigo XILDIIDDA, XULBADDA, MALMALKA iyo qofkii heli kara waxuun CADAR ah.

Waxyaabahaas ayaa guriga la dhigaa ama ilmaha loo xiraa. Marka uu cunuggu weynaado oo socdo waa la furahayaa waxaas, awal carafta ama uridda looga jeeday, meel baa lagu ridahayaa oo cunugga damboo doonaa loo dhigaaliyaa isagana oo markuu dhasho lagu xiraa. Jaalle waxaa kaloo jira kaloo ilmaha reermiyiga ku dhaca oo ah, waxaa la yiraadaa cunuggu hadduu shubmo waxaa ku dhaca ILKO-DAWOCO. Ilkadawaco waxaa laga wadaa MICIYADA salkooda oo bukooda: Haddii ilmahaasi shubanka deynwaayo oo hore u socon waayo oo calooshu shubanto ee uu matago oo ilmaha tabar daran oo diifeysan u ekado waxaa la leeyahay ilmahaan ilkadawacuu qabaa. Ilkadawacadaas nin farsamoyaqaan ah ayaa ilmihii loo geynahayaa, halkaa miciga salkiisa ah buu sarahayaa oo iliggi oo dhan buu tuurahayaa inta soo bixito. Afarta mici ha tuuro ama laba ha tuuro. Haddii ilkadawaco la sheego waxaa shardi ah in miciyada qaar la baxsho ama la wada bixiyaba. Macnaha ilkodawaco waa miciyada, ilmaha, salkooda oo bokooda. Waxaa kaloo ka mid waxyaalaha carruurta miyiga lagu daaweeyo wax la yiraahdo DHERI-KARIS ama GEEDO-KARIS. Cunugga hadduu bukoodo oo sidaan soo sheegnay oo kale xanuunsado oo diib? caloolxanuun iyo socodla'aan laga dareemo waa loo geedo-jartaa. Ilmaha markuu ku dhaco MADAXWEYNAADKA, MADAXBARKA ama CAMBAAR xataa ay madaxa ka gasho oo timuhu ka murmurxaan waxaa la yiraah cunuggaan LAKARIS buu qabaa. Waxaa jirta haween soomaali ah oo farsamadaas yaqaanna, ilaaba ilkodawacada raggaa daweeya, dherikariskana haweenkaa daweeya. Waxaa jira in qof haween ah oo farsamadaas wax ka taqaanna loo yeero. Waxaa loo soo qaadaa waxay ku dherikariyaan haweenkaasi, timir bay soo qaataan magaalooyinka laga keeno, caano geel, neef ido ah oo la qalay baridiisa , madaxiisa iyo lafo la isku daray waxbaa la karshaa, waxaa lagu daraa subag; xildiidda; waxaa lagu daraa toonta; waxaa lagu daraa geedo badan oo magaalada laga keeno oo aan haddaan aniga ii soo koobnayn. Digirtaa lagu daraa; timirtaa lagu daraa; yicib haddii la heli karaa lagu daraa; meseggada meseggo-yaryareyda ah yaa lagu daraa. Meeshaasaa, saaka waagu markuu beryo, inta dheri la soo qaato ama digsi, qof waliba wuxuu haysto, oo dab, holan ah, la shido oo meel dugsoon oo owdan la geeyo degsigaas, maantoo dhan sida loo karinhayo oo loo karinhayo, gabbalka wixii oo matuutaqay oo baabaa'y ayaa ilmihii hadduu wax cuni karo afka loo gelgelinhayaa, hadduusan waxba cuni karin subaggaasaa la miirahayaa, meel baa lagu shubahayaa waa la shiilahayaa, markuu subag saafi ah noqdo oo dhirtiiyoo dhan dhacaankeedii wato yaa mar kasta afka loo marinhayaa, korna laga marinhayaa. Inta aan la miirin digsigii maanta oo dhan karahayey,islaanta wax karineysay ayaa ilmihii dhabta ku qabaneysa, digsigiina halkaan hoosteeda ahey dhigeysaa, ilmihii bay maro ku huwinaysaa waa ku huurineysaa, kuleykii iyo bakhuurkii iyo dhirtii carafteedii ilmihii geleysa oo maantoo dhan kuleykaas lagu huurinhayaa. Ilmihii markii dhidid ka soo boodo oo cabbaar meeshii lagu haayo. Ilmihii markii muddo la huuriyo maradaa laga qaadahayaa waa la duubahayaa, dabeyshaa laga xirahaya, meel dugsoon iyo guriga gudahiisaa laga celinhayaa. Waxay u badan tahay in ilmahaas, toddobaadkaas dhan oo hadba la huurinhayaa oo hadba wax

lagu waxaynhayo, bannaanka iyo dabeyshaba laga celiyoo laga reebo ee uu guriga iska hurdo, halkaasna subaggisa iyo wixiisa lagu sameeyo. Waa daawo la yaqaan  oo sax ah oo dakhtar iyo cid ka horimaan kartaa toona aysan jirin. Waana wax la soo arkay oo la hubo tijaabadeeda. Dawada reermiyigu carruurta ku daweystaa wax yar ma ahan. Ilmaha maduxu weynaado oo MADAXBAR la yiraahdo iyagana huuriskaas aan sheegeynay waa lagu sameeyaa, waxaa lagu sameeyaa oo kale oo reermiyiga caado u ah waa la gubaa ilmahas. Niman baa jira farsamoyaqaan ah, sida nimanka aan sheegnay, oo ilkadawacada bixiya oo kale ayagaas baa ilmaha guba. Xididdo madaxa afartiisa gees ku jira, dhafoorrada timuhu ka soo baxaan iyo waxaas waana la gubaa oo dabkaas asagana lagu daweeyaa. Madaxbarku waa cudur ku yimaada madaxa oo biyo galaa, waxaana biyahaas lagaga saaraa ayada oo afar xidid, oo isku toosan ee madaxa ku yaal oo biyuhu ka galeen, dab laga dhejieo. Markii la gubana madaxii wuu isku soo uruurayaa. Sideedana waxay soomaalidu ku  maahmaahdaa:"Dab iyo  bugto  meel  ma wada galaan ". Waxaa kale oo aan wax ka sheegayaa furaadkii. Waxaa jirtay, haddaynu annagu nahay dadkan soomaalida ah, in aan iska ahayn dad reermiyi ah oo reerguuraa ah oo xoolodhaqata ah, magaalooyinna dalkeenna, qarniyaalkii hore, kaba jirin. Dadkuna uu magaalooyinka soo galay waqtiyo dambe. Xataa dadkeenna waaweyn waxaa jirtay waqti aan saa u fogeyn hadeerto in  la lahaa dadku  tolan jiray wax la yiraahdo ama la oran jiray DHUUG ama harag ay dadka tolan jireen. DHUUG macnahiisu waxaa weeyaan harag xoolood laga bixiyey weliba ari laga bixiyey, idaha laga bixiyey. Markii neefka idaha ah haragga laga baxsho haragga waa la dhisahayaa dhisimo badan baa lagu mudayaa, waa kala jiidahayaa. Haraggaas markii la dhiso oo uu qallalo iyaa la soo qaadahayaa bahal QURAAB la yiraahdo ama geedoqor afkeeda oo la shookeeyey ayaa saab loogu xoqayaa dhinicii dhogorta kaga tiil. Macnaha looga jeedo in lagu xuqo waa in dhogorta lagaga murxiyo oo xiirrimaad baa la yiraahdaa, haragga halla xiiro. Haraggaa la xiirahayo siyaalo badan baa loo isticmaalaa, waxaa laga sameystaa DARARKA iyo WADAAMAHA xoolaha lagu shubo. Haraggaas waxaa laga sameystaa xargaha haweenka tidcaan, waxaa laga sameystaa DHUUGGA iyw. DHUUGA haddaan ka soo qaadanno,

haragga markii la xiiro, inta la dhisay uu qallalay oo meeshii lagu dhisay inta laga fujiyo waa la xiirayaa. Markii la xiiro oo dhogorta laga murxiyo ayaa waxaa la gelinayaa asal, kaddib asalkii waa laga saarayaa waa la kawrixinayaa haddana, markuu in yar laabqoyaan yahay oo ay bashaqdii ka ba'do ee uusan qalleyl dhag ahna noqon ayaa la jejebinhayaa. Jejebintu waxaa waaye ayadoo saa gacmaha laysula marshoo la isku canbsoo, la isku canbusoo la riixriixoo oo waxaa loola jeeda inuu jilco oo qalleylkii ka ba'o. Asalkana waxaa loola jeeday inuu dhinac ka nafaqoobo, dhinacna inuu ka guduudto.